

# BADBAADINTA NOLOSHA

# MARWALBA WAA SHARCI

**Sharciga Minnesota wuxuu ku ilaalinayaa marka aad caawiso xaalad iska tan-badin ah.**

## **WAA MAXAY SHARCIGA STEVE?**

Sanadki 2014, Gobolka Minnesota wuxuu meelmariyay Sharciga Samatabixiyaha Wanaagsan, sidoo kale loo yaqaano Sharciga Steve, si dadka loogu dhiirigeliyo inay caawiyaan xaaladaha degdegga ah iyagoo aan ka cabsi qabin in dhibaato xagga sharciga ah ay kaga timaado. Tani waxay gacan ka gaysanaysaa yaraynta dhimashooyinka ka yimaada iska tan-badinta ee bulshadeena.

## **MAXAY KA DHIGAN TAHAY?**

Badbaadinta nolosha marwalba waa waxa saxda ah in la sameeyo, qofna waa inaysan dhibaato kaga imaan. Marka aad caawiso xaalad iska tan-badin ah, laguma xiri karo ama laguma soo dacwayn karo. Xitaa haddii aad sidato daroogo ama qalabka daroogada.

## **MAXAAD SAMAYNAYSAA?**

Naloxone sharci ahaan waa ay bannaan tahay in lagu qaato Minnesota, waana inaad marwalba sidataa. Marki aad aragto qof iska tan-badiyay, wac 911, sii NARCAN®, oo la joog ilaa ay ambalaas ka imaanayso. Walwal ma leh, runtii waa la oggol yahay!

**Waxa la sameeyo marka aad aragto iska tan-badin.**



**WAC 911 ISLA MARKIIBA**



**SII NARCAN® HADDII AAD HAYSO**



**LA JOOG QOFKA ILAA CAAWIMO KA TIMAADO**



**WAXAA KU ILAALINAYA SHARCIGA**



OGOW WAXBADAN OO KU SAABSAN  
SHURUUCDA DAROOGADA MINNESOTA  
[KNOWTHEDANGERS.COM/SUBSTANCE-USE-LAWS-TOOLKIT](https://www.knowthedangers.com/substance-use-laws-toolkit)

